# Talooyin Kooban

## Xeelado Kahortagaya Dabeecadaha Adag

Xeeladaha tageerada wanaagsan waxay kahortagi karaan dabeecadaha adag caruurtaadana xanaanada ku wanaajin kara.

### Hadalka Macalinka oo Wanaagga Leh

Hadalka Macalinka waxaa laga wadaa isticmaalka ereyo isku mid ah oo hadba loogu cel celiyo caruurta, weliba loo isticmaalo cunug dabeecado adag muujinaya.  Tani waxay kacaawinaysaa caruurta in ay nabad dareemaan waxayna ku dhiira galinaysaa in ay fakaraan inta aysan wax kukicin.  Ereyadaa waxaa kamid ah:

- Waan ku caawin doonaa.
- Waxaan ku oranayaa maya sababta oo ah.
- Arintaan waxay u eg tahay mid xal ubaahan. Bal aannu isla wada xallino.
- Mar dhow waa wagtigii.
- In nagufilan waan haysannaa.

### Farsamooyin soo jiidasho leh

Caruurta in lagusoodhaweeyo in ay dareemaan nabad ayagoo kulawadaagaya dareenkooda, ama haweeynaado ama hayaraado, waxay muujinaysaa in aad diyaar utahay in aad caruurta dhagaysatid iyo waxa ay dareemeyaan adigoo daryeel bixiye ah. Dareenkasta waa dareen mudan tixgelin lamana daciyi karo waa in dareenkasta lasoo dhaweeyo.

Soo jiidashada waxaa lagu dabikhi karaa ciyaarta ama wax barashada, sida waqtiga farshaxanka, ama in aad buug qiirada kusaabsan inta u aqrisid oo halkaa kasiiwadid.  Tusaale ahaan, goobta farshaxanka, waxaa dhigi kartaa sawiro qiiro leh, waxaana kudhiiragalin kartaa cunug waxa uu markaa dareemeyo ama sawirka waxa uu ogajeedo in uu sawiro.

Goobo kale oo caruurta ay kumuujin karaan dareenkooda waxaa weeyye:

- Goobta ciyaarta jilidda
- Goobta farshaxanka ama ciyaaro cajiinka
- Goobta buugta

Markii ay caruurtu si cad ay u muujin karaan dareenkooda , waxa kayaraanaya in ay dabeecad khallafsan layimaadaan ama ay si xumaan leh ay caruurta ama macalimadda oola hadlaan.

### Farsamooyinka Xakamaynta

Bay'ad xasilan oo amaan ah waxay kacaawinaysaa caruurta in ay nabad dareemaan.  Xakamayntu macnaheedu waxaa weeyye in bay'adda caruurta lagu hayyo ay tahay meel caruurta dareenkooda ama haweeynaado ama hayaraado lagudajin karo.

Caruurta qaarkood, weliba kuwa nolosha uu walbahaar kahaysto, waxay ubaahanyihiin xanaanadu in ay tahay meel ay kaheleyaan baal galin iyo nabadgalyo.  Tani waxay kaa rabtaa in aad latimaadid caado iyo shaqaale joogto ah.

### Amaanta

Amaanto iyo in looqiro cunuga waxyaabaha uu sameeyey waxay u horseedaa wanaag caruurta, waxayna taa kobcisaa in ay caruurta isku arkaan dad sharaf, qaymo, iyo karti leh. Ammanta wanaagsan:

- Cunuga magaciisa ayeey kudabakhdaa amaanta.
- Waa miid faahfaahin leh, waxayna cadaysaa waxa laga filayo caruurta, waxayna xoogga saartaa falka uu cunugu sameeyey, ee maaha shaqsiyadiisa.
- Waa mid lagu qanco.
- Waa mid kala duwan.
- Waa mid aan waxaba qasin.

### Tilmaanta oo loo Isticmaalo Qalab Dabeecadeed

Tilmaamahu waa dhaqdhaqaaq jireed iyo taagero hadal oo usheegaya caruurta waxa aan filayno in ay rabaan in

ay dhahaan ama ay soo wadaan. Waxay aad ucaawisaa caruurta ay ku adagtahay isbedelka ama hore usocodka.

### Tilmaamo Muuqaal

Tilmaanta muqaalka waa mid aan qashqashaad lahayn oo uu isticmaalkiisu fududyahay, sida in lagudhajiyo xeerarka fasalka darbiga iyo jadwalka maalmeedka ama in aad isticmaashid qalabka sheega heerka dhawaaqa. Ciyaalka ayaa laga yaabaa in ay leeyihiin tilmaamo gaar ah, oo muujinaya niyaddooda, si ay utusaan macalimiinta sida ay dareemayaan.

### Tilmaamo Maqal

Tilmaamaha maqalka ah oo afka laga sheego waxay caruurta xasuusiyaan hawsha markaa socota, wuxuu usheegaa waxa lagarabo, wuxuuna caruurta kudhiiragaliyaa akhlaaqda wanaagsan. Aad bay u quwad badanyihiin sababta oo ah hadii hal cunug loo isticmaalo, saamayn beey caruurta kale oo dhan dhaqankooda iyo akhlaaqdooda kuyeelataa.

### Tilmaamo Dhaqdhaqaaq Jireed ama Baaq

Baaqu waxaa weeye tilmaan ama jir dhaqaaq ay isla garanayaan macalinka iyo cunuga oo tilmaamaya dhaqanka cunuga lagarabo in uu kudhaqmo. Tilmaamahaan ama baaqaan waa mid ay hore caruurta iyo macalinka ogasoo wada hadleen caruurta nah ay fahansantahay waxa uu macnahoodu yahay.

### Tilmaamo Taabasho Jireed

Tilmaamahaan waa kuwo taabasho hagaysa cunuga kusalaysan, sida cunuga oo xoogaa garabka lagataabto asagoo ladareensiinayo in uu codka yareeyo. Ogsoonow in ilmo kasta ayasan si wanaagsan uqaabilin taabashada.

## Caadooyin oo loo Isticmaalo Qalab Dabeecadeed

Caadooyinka caadiga ah ayaa ilma kasta muhiim u ah sababta oo ah waxay kacaawinayaan caruurta in ay sii odoroosaan waxa soo socda. Caadooyinka khaaska ah oo maalinkasta dhaca waxay si gaar ah muhiim ugu yihiin caruurta ay lasoogudboonaatay walbahaar sababta oo ah noloshooda waxaa lagayaabaa in ay mid aan laqiyaasi karin ama la odoroosi karin ay tahay waxayna ubaahanayaan in ay laqabsadaan dadka oo ay aaminaan.

Caruurta waxay u baahanyihiin in ay ogaadaan caadada xanaanada ama fasalka kajirta in ay tahay mid quwad leh oo qaabili karta dareen kasta ama qiiro kasta oo kacsan. Hadii xitaa uu cunugu rabash kicin badanyahay, caadooyinka waa in ay kusocdaan jadwalkii iyo qorshihii loo dajiyey.

Bar caruurta caadooyinka adigoo kaashanaya jadwal sawir leh oo maalin kasta caruurta loo dul maro oo ah kuwo lagu dhaqmo maalinkaas oo dhan iyo marka isbedbedelku uu dhacayo.

## Xeerarka oo loo Isticmaalo Qalab Dabeecadeed

U ogolow caruurtu in ay kaqayb qaataan diyaarinta xeerarka. Xeerarka soo koob oo gaabi, tani waxaa lawadi karaa maalmoh hadii loo baahdo.

- Kawarayso caruurta talooyinkooda kulli nah qor.
- Kadhaadhacsii caruurta in ay xeerarku ujeedadoodu ay tahay in uu qof kasta badbaado. Kawarayso oo weeydii xeerarka tilmaamaya badbaadada iyo nabadgalyada.
- Isku deey in aad kusoo koobtid in aad taxdid saddax ama afar xeer oo kooban. Usamayso shax ama jaantus sawir iyo ereyo xeer kasta.
- Sawiradu waxay noqon karaan sawiro laga qaaday caruurta ayaga oo xeerarkii kudhaqmaya, farshxanno, ama sawiro laga jaray buugaag ama joornaal. Noqo qof hal-abuur leh caruurta nah in ay kucaawiyaan u ogolow.
- Dib ugu noqo xeerarka maalink kasta. Sawirka farta kufiiq adigoo caruurta weeydiinaya xeerka wuxuu yahay.

*Wixii macluumaad dheeraad ah,booqo [www.inclusivechildcare.org](www.inclusivechildcare.org).*

*Xuquuqda daabacaadda © 2025 Xarunta Xannaanada Carruurta Loo Dhan Yahay*

*Qalabkan waxaa laga yaabaa in si xor ah loo soo saaro ujeedooyin waxbarasho. Macluumaadka xaashidan tilmaantu waxay leedahay wax laga beddelay ilo badan.*

*Maalgelinta ay bixiso Waaxda Minnesota Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska.*